

Soomaaliya oo ka qeybgashay dabaaldega Dhaqana ee Carabta iyo Shiinaha

Dabaaldeggi afaraad ee Wasaaradaha Dhaqanka dalalka Carabta iyo Shiinaha, ayaa ka socda dalka Shiinaha magaalooyinkiisa Beijing iyo Chengdu.


Soomaaliya, waxaa uga qeybgalaya wafdi uu hogaaminayo Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska, Mudane Daahir Maxamuud Geelle.

Furitaanka dabaaldega, ayaa ka dhacay matxafka magaalada Beijing, waxaana furay wasiirka dhaqanka iyo dalxiiska ee dalka Shiinaha Luo Shugong, oo sheegay in tan iyo markii uu bilowday dabaaldega Dhaqanka Carabta iyo Shiinaha ay wax badan ka fahmeen dalalka Carabta, taasina ay keentay in xiriirka ay la leeyihiin dalalka Carabta uu aad u wanaagsanaado, maadaama fahamka dhaqan ee dal uu muhiim u yahay iskaashi kasta ee laba dowladood.

Waxaa wufuuddii matalaysay dalalka Carabta, oo uu horkacayo wasiirka dhaqanka ee Shiinaha ay socod ku soo mareen sawirro farshaxan ah oo la dhigay matxafka munaasabaddan awgeed, kuwaasoo laga soo uruuriyay dalalka Carabta. Geeska Afrika, waxaa kaga jiray dalka Djibouti oo goobta lagu soo bandhigay sawir uu qaaday sawir-gacmeed sameeye Muxumed Maxamed Xuseen. Sidoo kale, wasiirka warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska Soomaaliya, waxaa uu ka guddoomay wasiirka warfaafinta Shiinaha sawir-gacmeed ay sameysay Deeqa Abshir, oo soo bandhigtay muuqaal laba gabdhood oo gadaashooda ay tahay tuulo dalka Shiinaha ku taalla oo ka sheekeysanaya xusuustoodii Shiinaha ee Soomaaliya.

Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska Soomaaliya, Mudane Daahir Maxamuud Geelle, wuxuu kulan gaar ah la qaatay Wasiirka Dhaqanka iyo Dalxiiska ee Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinaha, Mr Lou Shugong, oo ay si faahfaahsan uga wadahadleen xiriirka taariikhiga ah ee ka soo dhexjiray dalalka Soomaaliya ee Shiinaha.

Waxaa kaloo kulankan joogay xubno sare oo ka tirsan xafiiska wasiirka dhaqanka iyo dalxiiska ee dalka Jamhuuriyadda dadka ee Shiinaha iyo dhinaca Soomaaliya oo shirka ay ku wehlyeen wasiirka La taliyaha Sare ee Wasaaradda Warfaafinta, Mudane Cabdiraxmaan Maxamed Aadan iyo safiirka Soomaaliya u fadhiya Beijing, Mudane Cawaali Cali Kulane.



Wasiir Daahir, ayaa wasiirka uga mahadceliyay sidii ay Soomaaliya uga dhiseen goobo dhowr ah oo ay ka mid yihiin Garoonka Kubadda Cagta ee Istaadiyo Muqdisho, Tiyaatarka Qaranka iyo Isbitaalka Banaadir. “Sii wadidda xiriirkaas, waxay Soomaaliya la tahay in uu yahay lagama maarmaan si loo abuuro iskaashi dhab ah oo dalka Soomaaliya wax u tara.”



Wasiir Luo Shugong, ayaa ka mahadceliyay ka soo qeybgalka Soomaaliya ee shirka afaraad ee dabaaldegga dhaqanka Carabta, isagoo sidoo kale ka faalooday taariikhda dheer ee Soomaaliya iyo Shiinaha oo uu sheegay in uu ka horeeyay sideetameeyadii. Wuxuu intaas ku daray in Soomaaliya ay ka mid ah Barnaamijka Horumarinta Carabta iyo Sidoo kale kan Africa, isagoo ugu baaqay in Soomaaliya ay ka faa'iideysato barnaamijyadaas.

Dib u dhiska Tiyaatarka Qaranka ee dalka Soomaaliya, oo la isku soo qaaday, ayaa Wasiir Luo Shugong uu sheegay in Shiinaha uu ku daray qorshayaashiisa mashruucyo horumarineed ee uu ku talojiro in uu Soomaaliya ka fuliyo.

Wasiir Geelle, ayaa soo dhoweeyay qorshaha Shiinaha, isagoo sheegay in madaxweynaha Soomaaliya oo ka soo qeybgalay shirkii ugu dambeeyay ee Africa iyo Shiinaha uu ka mid ahaa madaxdii wax ka saxiixday heshiiska horumarinta Africa ee China. Soomaaliyana ay diyaar u tahay in ay ka faa'iideysato qorshahaas.

Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska Soomaaliya, Mudane Daahir Maxamuud Geelle, wuxuu kaloo ka qeybgalay munaasabad casho Sharaf ah oo loo sameeyay dhamaan wufuuddii ka qeybgashay dabaaldegga afaraad ee dhaqanka Carabta iyo Shiinaha.



Waxaa kaloo wufuudda Carabta oo ay Soomaaliyana ka mid ahayd la soo tusay goobaha dalxiiska ugu caansan dalka Jamhuuriyadda Dadka ee Shiinaha sida Darbiga Weyn (The Great Wall), halka lagu xanaaneeyo xayawaanka ugu caansan Shiinaha ee Panda iyo Qabriga Boqorkii (Imbaradoorkii) Shiinaha ee Wang Jian, oo boqolaal sano ka hor la dhisay.



Ugu dambeyntii Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska ee dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya, Mudane Daahir Maxamuud Geelle, ayaa sheegay in Shiinuhu uu yahay dal ku dayasho mudan marka la eego horumarka ay ku tallaabsadeen muddo todobaan sano ah, iyagoo taana ku gaaray kala dambeyn iyo dal jeceyl mudan in looga dayday si dalkeena Soomaaliya mustaqbalka dhow uu ugu tallaabsado horumar aad u ballaran.

Dhamaad.

Sawirro kale:

